# Xalka Qaxootiga Soomaalida

## Darsidda Qaxootiga Iyagoon Raali Aheyn Laga Soo Celinayo

## Dhadhaab




Maxamuud Yuusuf Garre

Diseembar 2017

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2017, Muqdisho, Soomaaliya

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

**Qoraaga:** Maxamuud Yuusuf Garre waa cilmi-baare ka tirsan machadka Heritage

Bogga hore: Qaxooti Soomaali ku sugan Dhadhaab oo sugaya in dib loo celiyo
Sawirka: ©UNHCR/Assadullah Nasrullah

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/

Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org

# Tusmo


Nuxurka Qoraalka .......... 1

Qaabka Cilmi-baarista Loo Sameeyay .......... 5

Dib-u-Celin Aan Khiyaari Aheyn .......... 6

Macluumaad Aan Dhameystirneyn .......... 11

Dad Leyska Iloobay .......... 12

Caqabadaha Ugu Waaweyn .......... 13

- Min Xero Qaxooti ilaa Xero Barakacayaal .......... 13
- Nolol-maalmeedka .......... 15
- Waxbarashada .......... 16

Arrinta Kismaayo .......... 17

Dib-u-celin iyo Dib-u-Dejin Rasmi ah .......... 18

Amniga .......... 20

Gunaanad .......... 20

Talooyin .......... 21

## Nuxurka Qoraalka

Tan iyo sanadkii 2014, qaxooti kor u dhaafaya 73,000 ayaa laga soo celiyay Dhadhaab oo ku taala gobolka Waqooyi Bari ee Kenya, isla markaana ah xero qaxooti tan ugu weyn caalamka. Inta badan dadkan soo laabtay ayaa markoodii hore ka qaxay degaanada baadiyaha ee ay haatan ka taliyaan kooxda Al-Shabaab. Muddo afar sanadood ah ayey dowladda Kenya ka shaqeyneysay sidii loo xiri lahaa xerada Dhadhaab, iyadoo tilmaameysa in xeradu gabbaad u noqotay kooxaha argagixisada ah. Hay'adaha u dooda xuquuqda aadnaha ayaa eedeymaha Kenya ku tilmaamay kuwo aan waxba ka jirin, isla markaana lagu dulminayo dad markoodii horeba dhibanayaal ahaa. Bishii Febraayo 2017 ayey maxkamadda sare ee Kenya joojisay qorshaha dowladda Kenya ku dooneysay in ay ku xirto xerada Dhadhaab, iyadoo maxkamaddu go'aanka dowladda ku tilmaantay "takoorid" iyo "mid aan dastuurka qaafaqsaneyn". Tiro ka badan 45,000 qaxooti ah ayaa ilaa hadda ku laabtay magaalada Kismaayo, iyada oo tiro kale oo badanna ay ku laabteen magaalooyinka Baydhabo iyo Muqdisho. Badi qaxootiga soo laabanaya kuma haystaan dhul, hanti ama taakuleyn degaanada ay kusoo laabteen. Dowladda federaalka Soomaaliya door muuqda kuma laha qaxootiga kasoo laabanaya Kenya, wax taakulo ahna ma siiso. Maamul goboleedyada Jubaland (Kismaayo) iyo Koofur Galbeed (Baydhabo) iyaguna waa kuwo tabar yar, mana hayaan dhaqaalihii iyo kaabayaashii dib u dejinta loogu sameyn lahaa qaxootiga soo laabanaya. Arrimahan isbiirsaday waxey sababeen in dad badan oo kamid ah qaxootiga soo laabtay ay dareemaan in ay yihiin dad leyska ilaaway.

Waxaa taas sii dheer, in badan oo kamid ah qaxootiga wax badan kama garanayaan Soomaaliya, sababtoo ah waxa ay inta badan noloshooda ku qaateen xeryaha qaxootiga, hasa ahaatee qaxootigan lama siin fursad aan ka aheyn in ay Soomaaliya ku laabtaan. Hay'adda UNHCR oo aan qaxootiga siinin macluumaadkii ay u baahnaayeen ayaa sababtay in dowladda Kenya ka faa'ideysato macluumaad yarida jirta, isla markaana faafiso warar aan sal iyo raad laheyn oo sheegaya in qaxootiga aan isu diiwaan gelin in ay ku laabanayaan Soomaaliya lagu celin doono khasab, isla mar ahaantaana ay waayi doonaan lacagta $400 ee lagu taakuleeyo qaxootiga sida iskood ah isu diiwaan geliya in ay laabanayaan. Adeegyada waxbarasho iyo caafimaad iyo cuntadii iyo biyihii la siin jiray qaxootiga ayaa aad loo dhimay, waxeyna ciidamada amniga ee Kenya sare usii qaadeen cabsi gelintii iyo dhibaateyntii ay ku hayeen qaxootiga ku sugan xeryaha. Xeeladahan cabsi gelinta ah ayaa ku khasabtay qaxooti badan in ay isu diiwaan geliyaan in ay laabanayaan. Khaladaadkan muuqda oo ay hay'adda UNHCR iska indhatireyso kulana shaqeyneyso maamulka Kenya ayaan lagu tilmaami karin dib u celin khiyaari ah. Waxaase lagu tilmaami karaa dib u celin khasab ah – taasoo kasoo horjeeda shuruucda caalamiga ah.

Qaxootiga soo laabanaya waxay la kulmaan dhibaatooyin fara badan marka ay dalka yimaadaan. Caqabadaha ugu waaweyni waa xogta ay helaan oo ah mid kooban oo aan ku filneyn, taageerada ay ka helaan hay'adda UNHCR oo aad u yar, iyo la'aanta hoy, fursado shaqo, iyo adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka. Qaar ka mid ah qaxootiga ayaa ku noolaa Dhadhaab muddo rubuc qarni ah halka qaar kalena ay ku dhasheen Kenya weligoodna aan cag soo dhigin Soomaaliya. Xukuumadda Kenya waa in ay garowsataa arrinkan, ayna ilaalisaa waajibaadka uu farayo sharciga caalamiga ah ee ilaalinta qaxootiga. Kenya sidoo kale waxa ay u baahan tahay in ay fahamto in qaxootiga Soomaaliyeed ee ku sugan dhulkeeda iyo xagjirayaasha Al-Shabaab ee qalalaasaha ka wada Soomaaliya, mararka qaarna qalalaasaha ka geysta Kenya ay yihiin laba kala duwan. Marka la eego mustaqbalka, khasab ku celinta qaxootiga mudada dheer ku noolaa Kenya waxaa ay halis ku keeni kartaa ammaanka Kenya sababtoo ah xadgudubyada lagula kacayo qaxootiga waxaa ay keeni kartaa in ay dadkan u xero galaan kooxaha xagjirka ah. Qaxootiga Soomaalida ah ee ku nool Dhadhaab uma baahna go'aano aan loo meel dayin oo ay qaadato Kenya ama ismahdinta UNHCR balse waxa ay u baahan yihiin xal waara oo ku dhisan sharci iyo bini'aadanimo.

Waxaa jira laba hab oo lagu xalin karo xaaladda qaxootiga Soomaaliyeed ee ku sugan Kenya. Ugu horreyn, Kenya waa in ay si dhab ah u tixgelisaa in qaxootiga muddada dheer ku noolaa dalkeeda ee soo maray nidaamka waxbarasho ee Kenya, isla markaana awood u leh in ay Kenya ka shaqeystaan loo ogolaado in ay dalka sii joogaan oo dadka dhex galaan. Midda labaad, dib-u-noqoshadu waa in ay noqotaa mid aan khasab aheyn, sharafta iyo nabadgelyada qaxootigana aan lagu xadgudeyn. Beesha caalamka iyo xukuumadda Soomaaliya waa in ay meel dhigaan dhaqaalaha loo baahan yahay in dadka soo laabanaya dib u dejin loogu sameeyo. UNHCR iyo hay'adaha la howlgala ee caalamiga ah waa in ay joojiyaan oo ka feejignaadaan in ay xukuumadda Kenya kala shaqeeyaan qorshaha ay sida khasabka ah ugu soo celineyso qaxootiga Soomaalida. Xeryaha qaxootigana waa in loosoo celiyaa adeegyadoodii oo dhameystiran.

## Hordhac

Soomaalidu waxey qeyb ka tahay dadka ugu faraha badan ee muddooyinka dheer daafaha dunida qaxooti ku ah. Waxaa la qiyaasayaa in tiro ka badan laba milyan oo qaxooti Soomaali ah ay ku nool yihiin gobollada Bariga iyo Geeska Afrika. [1] Tirakoobyada hay'adda qaxootiga ee UNHCR ayaa muujinaya in ku dhawaad 900,000 oo qaxooti Soomaali ah ay haatan ku nool yihiin waddamada deriska ah.[2] Kenya ayaa hoy u ah tirada ugu badan ee qaxootiga

[1] "ReDSS Solutions Statement: Somalia," ReDSS, June 2015, http://www.regionaldss.org/sites/default/files/2015_2105_ReDSSstatementSomalia.pdf

[2] "Refugees in the Horn of Africa: Somali Displacement Crisis," UNHCR, 1 September 2017, http://data.unhcr.org/horn-of-africa/regional.php

Soomaalida ah, iyada oo 313,255 qof ay ku kala nool yihiin xeryaha kala duwan ee qaxootiga.[3] Inta badan dadkan ayaa ku nool xerada Dhadhaab oo ay hay'adda UNHCR aasaastay sanadkii 1991 kadib markii ay burburtay xukuumaddii millatariga ee Soomaaliya, dalkana ay ka curteen dagaalo sokeeye. Xerada Dhadhaab oo ka kooban: Dhagaxley, Xagardheera, Ifo, Ifo 2 iyo Kambioos (Kambioos waa la xiray) - waa xero kamid ah xerooyinka qaxootiga ugu caansan uguna weyn caalamka.[4] Qaxooti gaaraya 239,993 ayaa ka diiwaan gashnaa in ay ku nool yihiin xerada Dhadhaab bishii September 2017.[5]



Xerada Dhadhaab oo dusha laga sawiray

Xukuumadda Kenya ayaa isku dayeysay in ay xirto xerada Dhadhaab shantii sano ee lasoo dhaafay, kadib markii weerarro isdaba joog ah lagu qaaday kaniisadaha, suuqyada, dugsiyada, meelaha lagu caweeyo iyo gaadiidka dadweynaha ee magaalada Nairobi iyo gobolka waqooyi bari ee ay Soomaalidu degto.[6] Dadaalada ay xukuumadda Kenya ku dooneyso in ay ku xirto xerada Dhadhaab ayaa soo bilowday sanadkii 2012-ka, markii madaxweynihii hore ee Kenya, Mwai Kibaki uu ka sheegay shir Soomaalida loogu qabtay magaalada London in Dhadhaab ay khatar ku tahay ammaanka Kenya isla markaana uu ku boorinayo beesha caalamka in ay gacan ka geystaan dib u celinta qaxootiga Soomaalida.[7] Bishii Nofeembar 2013, heshiis saddex-geesood ah ayey kala saxiixdeen Soomaaliya, Kenya iyo UNHCR. Heshiiska ayaa la filayay in uu gogol xaadh u noqdo dib-u-noqoshada qaxootiga Soomaalida ah ee ku nool Kenya saddexda sano ee soo socota iyada oo la dhowrayo sharafta iyo karaamada qaxootiga.

Kadib weerar ay kooxda Al-Shabaab bishii Abriil 2015 ku qaadday Jaamacadda Gaarisa, sababayna dhimashada 148 arday, hoggaamiyeyaasha gobolka waqooyi bari ee Kenya iyo xubno sare oo ka tirsan xukuumadda Kenya ayaa dalbaday in UNHCR

[3] Ibid

[4] See TY McCormick, "The World's Largest Refugee Camp Is Invited to Please Shut Down," Foreign Policy, 21 July 2016. http://foreignpolicy.com/2016/07/21/the-worlds-largest-refugee-camp-is-invited-to-please-shut-down-kenya-somalia-dadaab

[5] "Operational Update, Dadaab, Kenya," UNHCR, 15 September 2017. http://www.unhcr.org/ke/wp-content/uploads/sites/2/2017/09/15-September-Dadaab-Bi-weekly-Operational-Update.pdf

[6] See Murithi Mutiga, & Emma Graham-Harrison, "Kenya says it will shut world's biggest refugee camp at Dadaab," The Guardian, 11 May 2016. https://www.theguardian.com/world/2016/may/11/kenya-close-worlds-biggest-refugee-camp-dadaab

[7] "Repatriating Dadaab refugees 'unrealistic'" IRIN, 16 August 2012. http://www.irinnews.org/report/96116/kenya-somalia-repatriating-dadaab-refugees-unrealistic.

ay xirto xeryaha Dhadhaab ayna dib u celiso dhammaan qaxootiga Soomaalida.[8] Madaxweyne-ku-xigeenka Kenya ayaa u qabtay hay'adda UNHCR in ay ku xirto xeryaha Dhadhaab muddo saddex bilood gudahood ah.[9] Hase ahaatee, kadib wadaxaajoodyo ay yeesheen Kenya, Soomaaliya iyo UNHCR ayaa lagu xaqiijiyay sida ay saddexdooda uga go'an tahay meel marinta heshiiskii saddex-geesoodka ahaa ee ay horay u wada gaareen, kaas oo dhigayay in dib u celintu noqoto ikhtiyaari ee aan cidna khasab lagu celin. Bishii Abriil 2015, guddi saddex geesood ah ayaa la magacaabay, kaas oo shaqadiisu tahay xaqiijinta fulinta heshiiska saddex geesoodka ah.

Dadaallada ay xukuumadda Kenya ku dooneyso in ay ku xirto xeryaha Dhadhaab ayaa lixaadsaday kadib markii bishii May 2016-kii ay mas'uuliyiinta Kenya ku dhawaaqeen in xeryaha la xirayo bisha Nofeembar 2016-ka, taas oo ku beegnayd wakhtigii uu dhacayay heshiiskii saddex geesoodka ahaa. Wasiirkii markaas hayay xilka wasaarada arimaha gudaha Kenya, Joseph Nkaissery ayaa sheegay in xeryaha qaxootiga ay "hoy" u noqdeen Al-Shabaab wuxuuna ku dooday in inta badan weerarrada argagixisada ee ka dhaca Kenya laga soo abaabulo gudaha xeryaha.[10] Xukuumadda Soomaaliya oo markeedii hore ka jiiftay arrimaha qaxootiga ayaa markaas bilowday in ay dhaqdhaqaaqdo, madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaana booqday Dhadhaab bishii Juun 2016. Madaxweynaha Soomaaliya ayaa u sheegay qaxootiga in aysan xukuumaddiisu marna raali ka aheyn dib-u-celin khasab ah, isaga oo yiri, "waxaan idiin xaqiijinayaa in aanan annaga (Kenya, Soomaaliya iyo UNHCR) waligeen ka wada hadlin, kuna heshiin in si degdeg ah dib leydinkugu celiyo xaalad aan la hubin."[11]

Markii uu dhamaaday heshiiskii saddex-geesoodka ahaa, Kenya ayaa muddo lix bilood ah ku kordhisay wakhtiga kama dambaysta ah ee ay ku xirayso xeryaha iyada oo markaa tixgelineysay codsi uga yimid hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay. Nkaissery ayaa sheegay in dhammaan qaxootiga dib loo celinayo bisha May 2017.[12]

Bishii Maarso 2017, Kenya ayaa marti-galisay shir ay kasoo qeyb galeen madaxda urur goboleedka IGAD, kaas oo xal waara loogu raadinayay qaxootiga Soomaalida ah ee ku nool gobolka. Maxamed Cabdullaahi

[8] "Leaders want refugee camps closed down," Daily Nation, 6 April 2015. http://www.nation.co.ke/news/politics/Refugee-Camps-Dadaab-Garissa-Attack/1064-2677628-20t9bfz/index.html

[9] "Kenya's tells UN to close Dadaab camp after Garissa attack," BBC, 11 April 2015. http://www.bbc.com/news/world-africa-32269944

[10] "Dadaab: Kenya to close the world's biggest refugee camp," Newsweek, 31 May 2016. http://europe.newsweek.com/kenya-close-dadaab-worlds-biggest-refugee-camp-november-465065

[11] "Somali President Visits World's Largest Refugee Camp," VOA, 6 June 2016. http://www.voanews.com/a/kenya-somalia-refugees/3363860.html

[12] "Kenya delays Dadaab refugee camp closure by six months," Al-Jazeera, 16 November 2016. http://www.aljazeera.com/news/2016/11/kenya-delays-dadaab-refugee-camp-closure-months-161116130647820.html

Farmaajo, Madaxweynaha Soomaaliya oo ka qeyb galay shirka ayaa ka codsaday madaxda dalalka IGAD in aysan si khasab ah dib u celin qaxootiga Soomaalida xilli ay abaar baahsan ka jirto Soomaaliya. Madaxweynaha Kenya, Uhuru Kenyatta ayaa dhankiisa ku celiyay sida ay xukuumaddiisa uga go'an tahay in ay xirto xeryaha Dhadhaab, isagoo ku andacooday in xeryaha ay noqdeen meelaha laga soo abaabulo falalka argagixisada iyo falal danbiyeedyada kale. [13] Rabitaanka Kenya ka sokow, golaha IGAD ayaa isku raacay in la abuuro "jawi dhiirigelinaya in qaxootiga Soomaalida ah dib ugu laabtaan dalkooda si ikhtiyaari ah oo ixtiraam ku jiro".[14]

Bishii Febraayo 2017, Maxkamadda Sare ee Kenya ayaa xannibtay qorshaha xukuumadda Kenya ee lagu xirayo Dhadhaab. Garsooraha maxkamadda ayaa ku tilmaamay go'aanka xukuumadda mid takoor ah oo khilaafsan dastuurka dalka, sababtoo ah xukuumaddu ma xaqiijin in Soomaaliya ay tahay goob ammaan ah oo ay qaxootigu ku laaban karaan. Sidaas daraadeed, maxkamadda ayaa ku dhawaaqday in go'aanka xukuumadda ee ah in xeryaha la xiro yahay "waxba kama jiraan."[15] Garsoore John Mativo ayaa intaa ku daray in "go'aanka xukuumaddu ay si gaar ah ugu bar-tilmaameedsanayso qaxootiga Soomaalida uu yahay mid sharci daro ah, takoor ah isla markaana khilaafsan dastuurka dalka."[16] Xukuumaddu waxa ay sheegtay in ay racfaan ka qaadan doonto, iyada oo qiil ka dhiganeysa in ay mas'uuliyad ka saaran tahay sugidda ammaanka muwaadiniinta Kenya.[17]

Iyadoo uu jiro dadaalada ay Kenya ku dooneyso in ay ku xirto xeryaha ayaa misana xilligii ay u qabatay in ay ku xireyso xeryaha oo ku aadanaa May 2017 la dhaafay iyadoo ay weli Dhadhaab ku sugan yihiin qaxooti ku dhow 240,000 oo qofood. Qaxootiga ku jira xeryaha Dhadhaab waxaa haysta welwel ku aadan mustaqbalkooda oo uu keenay hanjabaadaha joogtada ah ee ay xukuumadda Kenya ku sheegeyso in ay ku xireyso xeryaha. Doorka xukuumadda Soomaaliya oo aan muuqan iyo hay'adda UNHCR iyo hay'adaha kale ee caalamiga ah oo aan muhiimaddii la rabay siin arrinkan ayaa uga sii daray xaalada qaxootiga oo markoodii horeba dhibaato ku haysatay Kenya.

## Qaabka Cilmi-baarista Loo Sameeyay

Daraasaddan ayaa baaritaan ku samaysay xaaladda nololeed ee qaxootiga laga soo celiyay xeryaha Dhadhaab. Daraasaddu

[13] "IGAD Summit: Refugee camp never meant to be permanent home," Al-Jazeera, 28 March, 2017. http://www.aljazeera.com/video/news/2017/03/east-african-leaders-call-somalia-aid-170326054303117.html

[14] "Communique Nairobi Declaration on Somali Refugees," IGAD, 25 March 2017. https://igad.int/communique/1519-communique-special-summit-of-the-igad-assembly-of-heads-of-state-and-government-on-durable-solutions-for-somali-refugees

[15] "Kenyan High Court overrules on Dadaab refugee camp closure," Deutsche Welle, 9 February 2017. http://www.dw.com/en/kenyan-high-court-overrules-government-on-dadaab-refugee-camp-closure/a-37468097

[16] "Kenyan closure of Dadaab refugee camp blocked by high court," BBC, 9 February 2017. http://www.bbc.com/news/world-africa-38917681

[17] Ibid

waxa ay si gaar ah u daneyneysay in ay wax ka ogaato sida ay qaxootigu u gaareen go'aanka soo laabashada, xaaladdooda nololeed soo laabashada kadib (adeegyada bulsho ee aasaasiga, kuwa dhaqaalaha iyo amni ee ay la kulmeen soo laabashada kadib) iyo sida ay u arkaan mustaqbalkooda.

Cilmi-baaristan ayaa laga sameeyay Kismaayo, Muqdisho iyo Baydhabo. Saddexdan magaalo ayaa la doortay sababtoo ah waa magaalooyinka ay UNHCR ku celineyso qaxootiga dalka kusoo laabanaya. Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda ayaa soo ururiyay xogta daraasadda intii u dhaxaysay 10-kii Febraayo iyo 5-tii Abriil 2017. Daraasaddu waxa ay isticmaashay habka cilmi-baarista ee qualitative: baaris iyo falanqeyn wixii warbixinno horay u jiray, wareysiyo lala yeeshay dadkii muhiimka u ahaa daraasadda, dood-wadaagyo, iyo indha-indheyn lagu sameeyay goobaha daraasaddu daneyneysay.

Dad gaaraya 66 qof (41 ka mid ah ay yihiin dadkii soo laabtay) ayaa ka qeyb qaatay cilmi-baaristan. Afartan iyo shan wareysi oo qoto dheer ayaa lala yeeshay dad ku kala sugnaa saddexda magaalo ee cilmi-baarista laga sameeyay. Dadka la wareystay waxay isugu jireen dadka kasoo laabtay xeryaha Dhadhaab, mas'uuliyiin ka tirsan maamul goboleedyada iyo kuwa federaalka, iyo hay'adaha NGO-yada gudaha iyo kuwa caalamiga ah. Saddex dood-wadaag oo la qabtay ayaa waxaa ka qeyb qaatay dhalinyarada iyo xubno ka socday bulshada deegaanka.

## Dib-u-Celin Aan Khiyaari Aheyn

Inta badan qaxootiga soo laabtay ee aan wareysannay waxey xeryaha qaxootiga Kenya galeen sanadihii 2009 iyo 2011 xilli ay abaaro baahsan ka jireen dalka. Waxay ka baxeen waddankooda iyaga oo naftooda la cararaya, raadinayana badbaado iyo nabadgelyo. Waxa ay ku noolaayeen xeryo qaxooti oo go'doon ah muddo sanado ah waxayna la qabsadeen nolol qaxootinimo. Hadaba, si ay u gaaraan go'aan sax ah oo ku aaddan in ay dalkooda ku laabtaan iyo in kale, waxay u baahnaayeen in la siiyo ikhtiyaar isla markaana macluumaad dhameystiran laga siiyo xaaladaha dhabta ah ee dalkooda ka jira. Heshiiskii uu 1969 arrimaha qaxootiga ka gaaray Ururka Midowga Afrika (OAU) wuxuu tixgelinayaa mabda'a "ikhtiyaarnimada" marka ay timaado in qofku kusii noolaado dalka uu qaxootiga ku yahay ama uu ku laabto dalkiisii hooyo.[18] Inkasta oo dib-u-noqoshada ikhtiyaariga ah ay tahay xalka ugu fiican ee loogu talagalay badi qaxootiga, hadana in qofku si ikhtiyaar ah u doorto in uu dalkiisa ku laabto ayaa ah ah qodob aad muhiim u ah marka la eego nidaamyada caalamiga ah ee ilaaliya xuquuqda qaxootiga. Qaxootigu si ay go'aan sax ah uga gaaraan in ay dalkooda ku

[18] See OAU Convention Governing the Specific Aspects of Refugee Problems in Africa. http://www.achpr.org/files/instruments/refugee-convention/achpr_instr_conv_refug_eng.pdf

laabtaan iyo in kale, waxa ay u baahan yihiin inay helaan macluumaad buuxa oo ku saabsan xaalada dalkooda hooyo. Waxaa ay sidoo kale u baahan yihiin in ay ogaadaan xaaladda dalka ay magangelyada ku joogaan, tusaale ahaan, maxey la kulmayaan haddii ay go'aansadaan in ay dalka sii joogaan. Maqnaanshaha shuruudaha aan xusnay waxa ay dib-u-celinta qaxootiga ka dhigaysaa mid khasab ah, taasoo kahor imaaneysa heshiiska caalamiga ah ee qaxootiga ee la gaaray sanadkii 1951.

Inkasta oo dadka kasoo laabtay Dhadhaab ay sheegeen in aanan si khasab ah lagusoo celin, hadana waxaa ay caddeeyeen in soo laabashadooda aysan aheyn mid ay khiyaarkooda kusoo laabteen. Qaxootiga go'aanka ay ku gaareen in ay soo laabtaan waxaa asal u ahaa afar xaaladood: looma ogolaan in ay xeryaha sii joogaan, xog khaldan oo la siiyay, cabsi-gelin iyo xadgudubyo ay kala kulmeen ciidamada qalabka sida ee Kenya iyo hay'adaha gargaarka oo dhimay cunnadii, biyihii, iyo adeegyadii kale ee xeryaha qaxootiga.

Tan iyo markii ay xukuumadda Kenya ku dhawaaqday go'aanka ah in la xiro Dhadhaab, hay'adda UNHCR waxa ay ka shaqaynaysay in dadka aan Soomaalida aheyn ee ku sugan xeryaha Dhadhaab loo raro xerada Kalobeyei (Kakuma). Hasa yeeshee, qaxootiga Soomaalida ah looma ogolaan in la dejiyo xeryaha kale ee ku yaala Kenya, tan oo xalka keliya ee u haray qaxootiga Soomaalida ka dhigtay dib-ugu-laabashada dalkooda. Dhammaan dadka la wareystay ayaa u sheegay cilmi-baarayaasha Machadka Heritage in loo caddeeyay in xeryaha la xirayo, sidaa daraaddeedna aysan haysan xal aan aheyn in ay dalkooda dib ugu laabtaan.

Xog khaldan iyo hadalo been abuur ah oo ay bixiyeen mas'uuliyiinta Kenya ayaa ah arrin kale oo saameyn ku yeelatay go'aanka ay qaxootiga ku qaateen in dib loosoo celiyo. Waxaa qaxootiga lagu dhex faafiyay warar sheegaya in gaadiidka iyo lacagta loogu talo galay in la siiyo qaxootiga isu diiwaangeliya in ay laabanayaan aysan ku filneyn qaxootiga xeryaha ku sugan oo dhan. Waxaa markaa loo sheegay in ay tahay inay ka faa'iideystaan fursaddan ay haystaan, haddii kale waxaa imaan doonta wakhti si khasab ah lagu celiyo iyagoo aan la siinin wax lacag iyo kaalmo ah marka la gaaro wakhtigii xeryaha la xiri lahaa.

Hooyo 29 sano jirta oo afar carruur ah leh oo ku nooleed xerada Xagardheer ee Dhadhaab, oo dib loogu soo celiyay Muqdisho bishii Sebteembar 2016, ayaa ka sheekeysay sida ay ku gaartay go'aanka ay dib ugu soo laabatay:

> *markii ay Kenya go'aansatay in ay xirto xerada, waxaan dareemay cabsi ah waxa igu dhici kara aniga iyo carruurteyda haddii aanan ka faa'iideysanin diyaaradaha u socda Soomaaliya. Waxaan haystaa afar carruur ah oo yaryar, iyaga ayaana u cabsaday, haddii kale, waan iska sii joogi lahaa.*

Haweenaydan waxa ay ahayd saddex sano jir markii qoyskeedu u soo qaxeen dalka Kenya

kadib markii ay dhacday xukuumaddii millatariga aheyd sanadkii 1991. Waxa ay ku barbaartay, ku guursatay, kuna ilmo dhashay xerada. Waxaa khasab ku noqotay in ay kasoo hayaanto halkii hoyga u aheyd muddada intaa la'eg iyada oo ka cabsi qabta in ay waxyeelo kala kulanto ciidamada ammaanka Kenya haddii aaney ku laaban Soomaaliya.

Aabbe 60 jir ah oo dhalay toddoba caruur ah, kana soo guuray xerada Kambioos, oo dib loogu soo celiyay Kismaayo bishii Oktoobar 2016, ayaa ka sheekeeyay xaaladdii uu galay markii loo sheegay in qaxootiga si khasab ah lagu celinayo:

> *Waxaa naloo sheegay in aan waddankeena ku laabanno, haddaan is diiwaangelin weynana waxaa imaan doono wakhti khasab nalaku celiyo annagoo aan nala siin lacagta ay UNHCR siineyso dadka noqonaayo. Marka waxaan u cabsaday ilmaheeyga, waxaan is dhahay haddii khasab yimaado aniga iyo ilmaheyga khatar ayaan galeynaa.*

Cabsigelinta iyo dhibaateynta ay qaxootiga kala kulmeen Kenya ayaa saameyn weyn ku laheyd in qaxootigu go'aan ku gaaraan in ay dalkooda dib ugu laabtaan. Hoggaamiyeyaasha dowladda Kenya ayaa si joogta ah u sheegayay in xerada Dhadhaaab ay saldhig u tahay dagaalyahannada Al-Shabaab, sidaasoo kalena in weerarrada argagixiso ee Kenya ka dhaca laga soo abaabulo xeryaha. Mas'uuliyiinta Kenya, ka bilow madaxweyne-ku-xigeenka heer qaran ilaa iyo guddoomiye-ku-xigeen heer degmo waxa ay qaxootiga ku sifeeyeen in ay yihiin argagixiso iyo argagixiso kalkaal.

*"Xeradu waxa ay halis gelineysaa ammaanka, waxey gabbaad u tahay argagixisada waana meel lasoo marsiiyo alaabada sida sharci darrada ah dalka kusoo gasha, waxa ayna halis ku tahay deegaanka" ayuu yiri madaxweyne-ku-xigeen William Ruto.*[19]

Isagoo sii xoojinaya ololahiisa ka dhanka ah qaxootiga ayuu yiri: *"xerada qaxootigu waxaa ay halis ku tahay amniga Kenya."* [20]

*"Waxaan sanadihii lasoo dhaafay arkeynay, gaar ahaan sanadihii u danbeeyay in weerarradii argagixiso ee dhacay laga soo abaabulay lagana soo qaaday xeryahan,"* ayuu mar kale yiri Ruto.[21]

Mas'uuliyiin kale oo reer Kenya ah ayaa sidoo kale marar badan ku celceliyay in qaxootigu yihiin halis iyo khatar muuqata.

*"Qorsheyntii weerarkii lagu qaaday Westgate waxaa lagu dhameystiray xeryaha. Hubkii loo adeegsaday weerarkii*

[19] "Decision to close Dadaab refugee camp final, Ruto tells UN summit," The Star, 23 May 2016. http://www.the-star.co.ke/news/2016/05/23/decision-to-close-dadaab-refugee-camp-final-ruto-tells-un-summit_c1356213

[20] "Kenya Blames Terrorists for Its Decision to Close the World's Largest Refugee Camp," VICE & Reuters, 24 May 2016. https://news.vice.com/article/kenya-doubles-down-on-plan-to-shut-down-the-worlds-largest-refugee-camp

[21] See William Ruto at UN humanitarian summit in Istanbul, 24 May 2016. https://www.youtube.com/watch?v=ClQUJ7bShVI

*lagu qaaday Jaamacadda Garissa horraantii sanadkan waxaa la geeyay laguna qariyay xeryaha."* ayuu yiri wasiirka arrimaha gudaha Joseph Nkaissery.[22]

*"Xerada qaxootiga ee Dhadhaab waa degmo kale [oo Kenya ah] oo leh shuruucdeeda iyo xeerarkeeda oo sharci darro ah, wax walba oo ka jira halkaas waa sharci darro. Dembiyada, waad garan kartaa, kufsadayaal, dambiilayaal iyo tuugaba halkaas waa joogaan ... ma doonayno in ay degaankeenna ku bulaalaan*"ayuu yiri Maxamuud Cali Saalax, Iskuduwaha Gobalka Waqooyi Bari.[23]

*"Jiritaanka xerada qaxootiga ee Dhadhaab waxaa ay halis ku tahay amniga qarankeena, sababtoo ah sanadihii ugu dambeeyay inta badan howlaha argagixisada ee ka dhacay waddankan ayaa waxaa la ogaaday in laga soo abaabulay xeryaha Dhadhaab"* ayuu yiri Harun Kamau, ku xigeenka guddoomiyaha degmada Dhadhaab.[24]

Hadalladan kasoo yeeray hoggaanka sare ee Kenya ayaa dhiirigeliyay ciidamada amniga oo markoodii horeba caan ku ahaa xadgudubyo iyo falal ka baxsan bini'aadminimada oo ay kula kacaan qaxootiga Soomaalida.[25] Waxa ay ciidamadu kordhiyeen olalahooda ka dhanka ah qaxootiga kadib markii ay Al-Shabaab weeraro ka geysteen qeybo ka tirsan Kenya oo uu kamid yahay gobolka waqooyi bari. Dhalinyaro badan ayaa laga kaxeystay xeryaha kuwaasoo aan dib dambe loo arag. Kuwa kale ayaa iyaga dib loosoo celiyay iyagoo lasoo jirdilay, balse inta badan dhalinyaradaas ayaa lasoo daayay kadib markii ay eheladooda bixiyeen lacago baad ah oo ay dalbadeen ciidamada ammaanka.

*"Wiilkeyga ugu weyn waa 20 jir, waxaana filayaa in aad maqashay sida ay ciidamada Kenya dadka u bahdilaan? Wiilkayga guriga kama bixi karin. Iskuul ma aadi karin. Waxaa la xiray laba goor waxaana garaacay ciidamada booliiska Kenya. Dhaawaca aad uga jeeddo gacmaheyga [dhaawac biskooday ayaa ka muuqday gacmaheeda] waxaa ii geystay ciidamada booliiska Kenya anigoo saf ugu jira qaadashada cunno"*ayay tiri hooyo 37-sano jir ah oo ka timid xerada Kambioos oo dib loogu celiyay Muqdisho.

*"Sida ay booliiska Kenya ula dhaqmaan qaxootiga waa nolol ama geeri. Marka aniga waxaan go'aansaday in aan iska soo noqdo, xataa hadaan ku dhimanayo Muqdisho"* ayuu yiri nin 31 jir ah oo kasoo laabtay xerada Dhagaxley oo haatan ku sugan Muqdisho.

Inta badan dadkii aan wareysannay ayaa sheegay in dhibaatada ay ciidamada Kenya ka geystaan xeryaha qaxootiga ay aheyd mid

[22] "UN agency staff linked to terror," Daily Nation, 5 October 2015. http://www.nation.co.ke/news/UN-agency-staff-linked-to-terror/1056-2900374-5k2xxqz/index.html

[23] See Mohamud Ali Saleh, North Eastern Region Coordinator. https://www.youtube.com/watch?v=ClQUJ7bShVI

[24] See Harun Kamau, Deputy County Commissioner – Dadaab Sub County. https://www.youtube.com/watch?v=ClQUJ7bShVI

[25] "Somalis scapegoated in counter-terror crackdown," Amnesty International, 27 May 2014. https://www.amnesty.org/en/latest/news/2014/05/kenya-somalis-scapegoated-counter-terror-crackdown/

joogto ah.  Ciidamada ayaa mar kasta dadka soo qabqaban jiray, gaar ahaan dhalinyarada kadibna dalban jiray laaluush. Inta badan dadka lasoo celiyay ee la wareystay ayaa sheegay in booliisku ay garaaci jireen qaxootiga sabab la'aan marka safka loogu jiro cuntada. Dumarka ayaa gaar ahaan qiireysnaa markii ay ka sheekeynayeen dhibaatooyinkan. Inta badan dadka soo laabtay ee la wareystay ayaa muujiyay inaaney marnaba u xiisi doonin noloshii xeryaha qaxootiga, xataa iyagoo haatan ku sugan Soomaaliya oo ah meel aan xaaladeeda weli leysku haleyn karin.

Hay'adaha gargaarku waxa ay hoos u dhigeen adeegyadii ay heli jireen qaxootiga, taasoo sii adkeynaysa nolosha qaxootiga oo markeedii horeba adkayd oo liidatay. *"Cunnada raashinka ayaa la dhimay, noloshuna waxey noqotay mid adag,"* ayaa uu yiri aabbe 45-jir ah oo saddex caruur ah dhalay haatanna ku sugan Kismaayo. "*Waxay (hay'adaha gargaarku) yareeyeen biyaha, raashinka, mushaharka macalimiinta iskuulada. Marka qaxootigu waxay billaabeen inay isu diiwaan-geliyaan in la celiyo"*ayuu yiri nin 23-jir ah oo kusoo laabtay Kismaayo.

Dadka soo laabtay ayaa ka waramay sida cunnadii yareyd ee ay labadii todobaadba mar qaadan jireen loo yareeyay. Cunnadan oo markeedii horeba aan ku filneyn ayaa misana wax badan laga sii jaray. Biyihii ayaa la yareeyay, taasoo keentay in saacado badan saf loogu jiro si loo helo biyo. Dad badan ayaa u fasirtay arrinkan in ay cadeyn u tahay sida hay'adaha gargaarku Kenya ugala shaqeynayaan sidii xeryaha loo xiri lahaa.

Inkasta oo heshiiska saddex-geesoodka ah ee horay loo galay uu dhigayo in dib u celinta qaxootigu ay noqoto mid ikhtiyaari ah, lana xaq dhowro sharafka iyo karaamada qaxootiga, hadana dadka la wareystay ayaa ku waramay in waxa ay soo mareen ay taas ka duwan tahay.

Nin ka shaqeeya arrimaha gargaarka oo lagu wareystay Kismaayo ayaa ku dooday in soo celinta qaxootiga aaney ikhtiyaari aheyn:

> *Qaxootigu si iskood uma soo noqonayaan sababtoo ah dadkaan waa la cabsi geliyay waxeyna Kenya uga soo tagayaan cabsidaas darteed. Dad haysta adeegyo dhameystiran oo hadana kusoo laabanaayo meel aan waxba jirin, su'aal ayaa la iska weydiin karaa in dadkaan iskood usoo laabteen iyo in kale.*

Qaar ka mid ah dadka soo laabanaya ayaa ku waramay in markii ay is diiwaan geliyeen aan codsigooda horay loo wadin. Sababta ayaa lagu sheegay dadka is diiwaan gelinaya oo aad u badnaa iyo UNHCR oo aan markaas hayn tasiilaadkii iyo gaadiidkii ay u baahnaayeen dadka laabanaya. Marka cabsida haysay dadka qaar ayaa keentay in ay sugi waayaan in codsigooda la gaaro. Qaarkood ayaa bixiyay lacago laaluush ah si loo dedejiyo safarkooda dib u laabashada.

Nin 24 jir ah oo ku laabtay Kismaayo bishii Diseembar 2016 ayaa yiri:

*Markii aan is diiwaan geliyay kadib, waxaan sugayay muddo shan bilood ah in ley celiyo. Qof codsigeygii ka shaqeynaayo markaan waayay. Waxaa markaas khasab igu noqotay in aan bixiyo 1000 shilinka Kenya ah ($10), markaas ayaa codsigeygii la tixgeliyay oo ley soo qaaday.*

Sababaha keenay in qaxootigu ku degdegaan in lasoo celiyo waxaa asal u ah dhibaatooyinka aan sare kusoo xusnay kuwaas oo nolosha ka jirta xeryaha qaxootiga ka dhigay mid dhib badan. Inta badan dadka lagu wareystay cilmi-baaristan, oo ka tagay Soomaaliya xilli abaaro ba'an iyo nabadgelyo-xumo ay ka jireen dalka ayaa misana kusoo laabtay dalka wakhti uu waddanku la tacaalayo abaaro iyo ammaan darro. Tirokoob ay hay'adda UNHCR ka sameysay Dhadhaab bishii Agoosto 2016 ayaa lagu ogaaday "in 341,574 qof oo ka diiwaangashanaa xeryaha Dhadhaab, laga helay in ay xerada ku sugnaayeen dad dhan 283,558 qof." [26] Taas macnaheedu waxa weeye 58,016 qof oo hay'adda ugu diiwaan gashnaa in ay xerada ku nool yihiin aaney xaqiiqo ahaan ku nooleyn. Qaxootigaan ayaa waxaa dhici kara in ay si iskood ah iyagoo aan helin wax kaalmo ah dib ugu laabteen Soomaaliya, waxaase kaloo dhici karta in ay ku dhex dhuunteen dalka Kenya.

## Macluumaad Aan Dhameystirneyn

Qaxooti badan oo Soomaali ah ayaa ku noolaa Kenya tan iyo markii la aasaasay xeryaha qaxootiga muddo rubuc qarni ka hor. Ka hor inta aan la soo celin qaxootiga, waxa ay u baahan yihiin in la siiyo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan meelaha loo celinayo si ay markaa u qaataan go'aan sax ah. Intaa waxaa dheer, waxay u baahan yihiin macluumaad la xiriira xaaladda degaanadii ay horay u degenaan jireen intii aysan dalka ka qixin kahor. Faahfaahin buuxda oo ku saabsan xaaladda amniga ee degaanada loo celinayo iyo adeegyada waxbarasho iyo caafimaad ee ka jira goobaha loo celinayo waxey ka caawineysaa qaxootiga in ay qaataan go'aan sugan. Si kastaba ha ahaatee, tani ma aysan dhicin sababtoo ah inta badan dadkii u waramay Machadka Heritage ayaa sheegay in aysan helin macluumaadkii ay u baahnaayeen.

UNHCR waxa ay siisay qaxootiga macluumaad kooban oo ku qoran buug yar. Hasa ahaatee qof kastaa ma helin nuqul, qof kastana wax ma aqrin karo. Dad ka tirsan qaxootiga soo laabtay ayaa u sheegay Machadka Heritage in ay ku tiirsanaayeen xogta ay ka maqlaan dad kale, tan ayaana keentay in warar aan sal laheyn lagu dhex faafiyo qaxootiga.

[26] "UNHCR conducts joint verification of refugees with the government of Kenya" UNHCR, 24 February 2017. http://www.unhcr.org/ke/10374-unhcr-conducts-joint-verification-refugees-government-kenya.html

## Dad Leyska Iloobay

Marka ay qaxootigu iska diiwaan galiyaan xafiiska dib-u-celinta, hay'adda UNHCR waxa ay diyaarisaa gaadiidka iyo sahayda safarka, dadka qaar ayaa lagu qaadaa gawaari, halka qaar kalena lagu qaado diyaarado. Marka dadkan soo laabanaya ay yimaadaan Soomaaliya, waxaa la geeyaa xarumo nasasho oo ay joogi karaan muddo 24 saacadood ah. Qaxootiga ku yimaada diyaarado waxaa ay helaan lacag dhan $350 qofkiiba halka qaxootiga kusoo laabanaya gawaarida ay helaan lacag dhan $400 qofkiiba. Dadka soo laabtay ayaa inta lagu jiro lixda bilood ee ugu horreysa xaq u leh in ay helaan kaarar ay cunto ku gadan karaan oo ay ku jirto $15 qofkiiba, bishiiba, iyo lacag dhan $200 bishiiba oo loogu talo galay in qoyskiiba u isticmaalo baahidooda caafimaad. Lacagahan waxaa loogu talo galay lixda bilood ee ugu horeysa keliya.

Inta badan dadka soo laabtay ee lagu wareystay cilmi-baaristan waxa ay dareensanaayeen in ay yihiin dad la keenay Soomaaliya kadibna leyska ilaaway oo ay hay'adda UNHCR iyo hay'adaha kale ee gargaarku dayaceen. Badi dadkii soo laabtay ee la wareystay ayaa ku waramay in hay'adda UNHCR iyo hay'adaha kale ee gargaarka ayan fulin ballanqaadyadii ay sameeyeen ee ahaa in dadka laabanaya la siin doono hoy, maalgashi ganacsi yar iyo fursadaha nolol-raadsiga. Qaxootigii lasoo celiyay sanadihii 2014 iyo 2015 ayaa sheegtay cabashooyinka ugu xooggan/badan, iyaga oo sheegaya in markii ay dalka kusoo laabteen aaney hay'adda UNHCR ka helin wax taakulo lacag ah ama maacuunta guryaha. Waxa ay sheegeen in waxa keliya ee la siiyay uu ahaa masago (hadhuudh).

Waxaa jira hay'ado caalami ah oo UNHCR u xilsaaratay fulinta howlaheeda shaqo, sida maamulka goobaha nasasho ee qaxootiga soo laabanaya ku hakadaan, [27] iyo maamulidda adeegyada waxbarasho iyo caafimaad. Hay'adahan ayey aheyd in ay dadka soo laabanaya siiyaan adeegyada ay xaqqa u leeyihiin, hasa ahaatee qoysas badan oo soo laabtay ayaa ka cabtay in aaney helin lacagihii iyo adeegyadii ay aheyd in ay helaan. Qaar kamid ah dadkii laga wareystay magaalada Kismaayo ayaa iyagu ka cabtay in aaney helin lacagaha loo qoondeeyay in ay xaqootiga u isticmaalaan caafimaadka iyo lacagaha cunnada.

Ayeeyo 65 sano jir ah oo lagu wareystay Kismaayo ayaa tiri:

> *Waxaan halkan joogay muddo afar bilood ah, waxaan helay kaarka cuntada. Hasa ahaatee, lacagta $200 ee ay aheyd in aan helo waxaa la i siiyay bil keliya, wixii ka dambeeyayna ma helin. Ma dacwoonin sababtoo ah ma garanayo meel aan cabasheyda u gudbiyo.*

[27] Kismaayo transit centre (Mercy Corps), Afmadow transit centre (ARC), Luuq transit centre (DRC), Baydhabo transit centre (INTERSOS) and Mogadishu transit centre (IOM)

Qaarkood waxa ay u cabteen hay'adaha fulinaya howsha, hasa yeeshee waxaa qaarkood loo sheegay in ay soo laabtaan, halka qaar kalena aan dacwaddooda cidiba dhageysan. Qaar kale oo badan ayaan iyagu garaneyn in ay xaq u leeyihiin in ay cabasho gudbistaan iyo cid ay cabashadooda u gudbistaan.

Aabbe 33 sano jir ah, dhalay shan caruur ah oo lagu wareystay Kismaayo ayaa ku waramay/yiri, *"muddo laba bilood ah ma helin kaarka cuntada iyo lacagta $200 ee bishiiba mar la helo."* Wuxuu hadalkiisa sii raaciyay in uu *"tegay xafiis kasta, laakiin qof dhibkaan xaliso ma jirin".*

Cilmi-baarayaasha Machadka Heritage oo booqday xafiisyada hay'adda qaxootiga iyo barakacayaasha ee magaalooyinka Muqdisho iyo Kismaayo ayaa halkaa ku arkay tiro dadkii kasoo laabtay Kenya oo xafiisyadaas u tegay cabasho la xiriirta in aaney helin lacagihii iyo adeegyadii ay xaqqa u lahaayeen. Shaqaalaha hay'adda ayaa ka qora cabashada kadibna u gudbiya hay'adaha ay UNHCR u xilsaartay fulinta adaagyadaas. Qaxootiga kusoo laabtay Muqdisho ayaa aad uga cabanayay in aaney helin adeegyadii waxbarasho iyo caafimaad ee loo ballan qaaday.

## Caqabadaha Ugu Waaweyn

Hoy la'aan, nolol-maalmeedka oo si adag lagu helo iyo waxbarasho la'aan ayaa kamid ah caqabadaha badan oo ay wajahayaan dadka sida khasabka ah loosoo celiyay.

### Min Xero Qaxooti ilaa Xero Barakacayaal

Kismaayo waxa ay hooy u tahay tirada ugu badan ee dadka lasoo celiyay, waxana lagu qiyaasay in 45,020 qof oo dadkaasi ah ay ku noolaayeen magaalada bishii Sebtembar 2017.[28] Qaar waxa ay ku noolaayeen guryo kiro ah ee ku yaalla duleedka magaalada, balse inta badan dadkaasi waxa ay ku noolaayeen xeryaha barakacayaasha. Wareysiyo aan ka sameynay Baydhabo waxa ay muujiyeen in qaar yar ay ku milmeen lana qabsadeen magaalada. Cilmibaarayaasha Machadka Heritage oo booqday xeryo barakacayaal ee ku yaalla magaalada Baydhabo waxa ay soo arkeen xero IFO 2 la yiraahdo oo loogu magac daray xerada qaxootiga ku taalla Dhadhaab.

Magaalada Muqdisho, dadka lasoo celiyay waxa ay ku nool yihiin intooda badan xeryo barakacayaal oo ku yaalla wadada u dhexeysa Muqdisho iyo Afgooye. Dadkan waxa ay sheegeen in aanay awood u lahayn in ay iska bixiyaan lacagaha kirada ay doonayaan milkilayaasha guryaha ku yaalla caasimadda. Qaar kale waxa ay ku nool yihiin guryo kiro ah oo ku yaalla degmada Dharkenley ee ku taalla galbeedka Muqdisho oo iyadu qiime ahaan ka jaban kirada guryaha ku yaalla gudaha magaalada.

Magaalada Kismaayo, dadka lasoo celiyay waxa ay u sheegeen cilmibaarayaasha Machadka Heritage in ay boos ka waayeen xerooyinka barakacayaasha oo ay horey u buux dhaafiyeen qoysaskii kasoo barakacay

[28]Tirakoobkan waxa na siiyay Guddiga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Jubaland

abaarta. Waxa ay ku khasbanaadeen in ay kireystaan dhismayaal dhul aan sharciyeysneyn laga sameeyay oo ku yaalla duleedka magaalada. Cilmibaarayaasha waxa ay soo arkeen afar qoys oo wadaagaya laba qol si ay u qeybsadaan kirada guriga.

Hooyo jirta 37 sano oo heysata toddobo caruur ah ayaa sharraxaad ka bixisay dhibaatada iyo culeyska ay ka martay kirada guryaha:

> *ma awoodno in aan iska bixinno lacagta kirada, taasi ayaa ah dhibaatada ugu weyn. Afar qoys ayaan ku degannahay gurigan ka kooban labada qol.Waxa jiray qoys kale oo nala daganaa gurigaan balse guuray maalin kahor. Gurigan ayaan shan qoys ku daganeyn.*

Dabcan xaaladdan ma ahan mid ay kusii jiri karaan, balse dadka lasoo celiyay ma heli karaan kirada qolal dheeraad ah iyaga oo aan helin ilo dhaqaale kasoo galo.

Wasiir ka tirsan dowlad goboleedka Jubaland waxa uu u sheegay Machadka Heritage in madaxdu ay garwaaqsan yihiin in qaxootiga soo laabanayo ay u baahan yihiin dhul ay guryo ka dhistaan. Waxa uu wasiirku sheegay in Jubaland ay u qoondeysay una diyaarisay qaxootiga soo laabanayo dhul weyn oo bannaan.

Hay'adaha NRC iyo IOM waxa ay 800 iyo 500 oo guri u dhiseen dadka soo noqonaya, barakacayaasha, iyo dadka deegaanka ee tabarta daran. Sikastaba ha ahaatee, guryahan ma ahan kuwo ku filan qaxootiga kusoo noqonaya Kismaayo. Hay'adaha NRC iyo IOM waxa ay dhiseen guryo ka kooban hal qol iyo musqulo la wadaagayo. Inkastoo faa'idooyin badan ay leedahay in barakacayaasha iyo qaxootiga loo dhiso guryo, haddana caqabado ayaa jira. Tusaale ahaan, guryahan oo ay booqdeen cilmibaarayaasha Machadka Heritage waxa ay ku yaallaan duleedka magaalada mana laha kaabayaasha muhiimka ah sida waddooyin ku xira magaalada, xarumo caafimaad, iskuullo iyo suuqyo.



Guryo Kismaayo looga dhisay qaxootiga soo laabtay iyo Barakacayaasha

Arrinta ugu muhiimsan ayaa ah waxa jira walwal amni xumo maadaama guryahan ay ku yaallaan duleedka magaalada. Qaar kamid ah guryahan waxa ay ku yaallaan meelo aad ugu dhaw xarunta ciidamada AMISOM, taasi oo sii kordhineysa khatarta amni ee dadka degaya guryahan soo wajahi karto haddii Al-Shabaab ay soo weeraraan ciidamada AMISOM. Guryahan lama degin marka cilmibaarayaasha Machadka Heritage ay booqanayeen, waxana suuragal ah in qaar ama dhammaan kaabayaasha aasaasiga ah ee hadda ka maqan in mustaqbalka loo sameyn doono.

Guryahan dhawaan la dhisay waxa suuragal ah in ay mustaqbalka isku beddellaan xaafado ay degaan kaliya qaxootiga soo noqday iyo barakacayaasha sida ka dhacday dhowr magaalo oo Soomaaliya katirsan. Qaxootiga soo laabanayo iyo barakacayaasha waa in aan la takoorin laguna shaabbadeynin in ay koyto ku yihiin dalkooda, waana in ay ku milmaan bulshada magaalada.

Inta badan dadka soo noqonaya oo aan wareysannay waxa ay markoodii hore ku noolaayeen dhulka baadiyaha iyo tuulooyinka, sidaas darteed dhul kuma laha magaalooyinka oo ay hadda ku nool yihiin.

Kismaayo ayaa wajaheysa isticmaalka dhul baaxad leh oo aan sharciyeysneyn, waxana ay tani sababtay is-qabqabsi dhul oo ay qaar kamid ah qaxootiga soo noqonaya qeyb ka noqdeen. Ganacsade ku sugan Kismaayo ayaa cilmibaarayaasha Machadka Heritage u sheegay in "*qaar kamid ah qaxootiga soo noqday ay dhulal gateen kadibna loo sheegay in ay dhulalkaas banneeyaan maadaama ay dhulka ka gateen qof aan milkiyaddiisa lahayn*." Kuwo kale waxa suuragal ah in ay wajahayaan dhibaatooyin la xiriira sida dhulkooda oo ay ka carareen kadib dagaalladii sokeeye ay hadda dib ugu soo ceshan lahaayeen.[29]

## Nolol-maalmeedka

Inta badan dadka aan wareysannay, gaar ahaan kuwa ku nool Kismaayo iyo Baydhabo, waxa ay ahaayeen dad xoolo dhaqato ahaa kahor inta aanay u qixin Kenya. Waxa ka baaba'ay xoolahoodii abaaro daran oo dalka ku habsaday awgood, waxa ayna inta badan ku tiirsanaayeen cunno ay siin jirtay UNHCR inta ay xeryaha qaxootiga ku jireen. Maadaama hadda ay kusoo laabteen magaalooyin, waxa ku adag in ay la qabsadaan. Ma heystaan aqoonta, tababarka iyo xirfadaha looga baahan yahay shaqooyinka, sidoo kalana ma heystaan lacago ay ku abuurtaan ganacsi. Qaar kamid ah dadka aan wareysannay waxa ay isticmaaleen lacago yar oo ay ka heleen UNCHR si ay kirada guryaha isaga bixiyaan. Intooda badan dadka waxa ay ka shanqariyeen in aanay baadiyaha degi karin sababo amni darro awgood. Tusaale ahaan, inta badan qaxootiga kusoo laabtay Kismaayo waxa ay markoodii hore ku noolaayeen gobolka Jubada Dhexe oo ah gobol gebi ahaantiisa ay maamulaan Al-Shabaab. Dadka aan ka wareysannay Baydhabo waxa ay sidoo kale badankoodu kasoo jeedaan ama markii horeba ka barakaceen tuulooyinka ku yaalla nawaaxiga Baydhabo oo ay hadda Al-Shabaab ka taliyaan.

[29] "Land Matters in Muqdisho," The Heritage Institute for Policy Studies and Rift Valley Institute, February 2017. http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2017/02/Land-Matters-in-Mogadishu-RVI-Rift-Valley-Forum-and-HIPS-2017.pdf

Hab-nololeedka qaxooiga soo noqday waa ay is beddeshay. Waxa ay ku noolaayeen xero qaxooti waxa ay helayeen adeegyo aanan laga helin dhulka baadiyaha, waxa ayna la qabsadeen nolosha magaalada. Caruurtooda waxa ay dhiganayeen iskuullo, waxa ayna helayeen adeegyo caafimaad. Maadaama hadda noloshu is beddeshay, qaar badan oo qaxootiga soo laabtay kamid ah waxa ku adag in ay ku laabtaan dhulkii baadiyaha.

Heerka shaqo la'aanta dalka Soomaaliya aad ayuu u sarreeyaa. Si aad shaqo u hesho, waxa aad u baahan tahay in aad leedahay xirfad, magaalada faham buuxa u leedahay, islamarkaana kaashataa saaxiibbo iyo xiriir maadaama shaqaaleysiinta inteeda badan ay ku saleysan tahay qabiil ama qoys. Qaxootiga soo laabtay oo iyagu ka maqnaa dalka sanado badan, gaar ahaan kuwa aan lahayn xirfad shaqo, waxa aad ugu adag in ay shaqo helaan.

### Waxbarashada

Waalidiinta aan wareysannay intooda badan waxa ay inoo sheegeen in ay walwal badan ka qabaan mustaqbalka caruurtooda. Inta ay ku jireen xeryaha qaxootiga waxa ay haysteen waxbarasho lacag la'aan ah oo ka tayo wanaagsaneyd waxbarashada taalla Kismaayo. Macalimiin aqoon u leh maadooyinka ayaa caruurta wax kusoo baray xeryaha qaxootiga iyaga oo isticlaamaya manhajka Kenya, taasi oo ah mid ka duwan waxbarashada taalla Soomaaliya oo aan shuruuc nidaamisa helin muddo ka badan labaatan sano, tayadeeduna liidato.

Adeegyada waxbarasho ee ay helaan qaxootiga soo laabtay waxa ay ku xiran tahay meesha ay degeen. Tusaale ahaan, waalidiinta aan ku wareysannay Kismaayo caruurtooda waxa ay heleen waxbarasho lacag la'aan ah, hay'ado ayaana ka bixiya lacagaha lagu dhigto iskuullada. Qaar kamid ah waalidiinta waxa ay sidoo kale dareeska iskuulka ka helayaan hay'ado. Sidaas si ka duwan, qaxootiga soo laabtay ee aan ku wareysannay Muqdisho caruurtooda ma heystaan waxbarasho lacag la'aan ah. Qoysaskan ma awoodaan in ay caruurtooda ka bixiyaan lacagta iskuulka sidaas darteed caruurtoodu waa gurijoog aan waxba baran.

Qaar badan oo ku sugan Baydhabo ayaan sidoo kale u helin caruurtooda waxbarasho. Qoysaska aan wareysannay ma awoodaan in ay lacagaha iskuulka iska bixiyaan waxa ayna caruurtoodu iska joogeen guryaha. Sikastaba ha ahaatee, maamule iskuul oo u warramay Machadka Heritage ayaa sheegay in ay jiraan hay'ado lacagaha iskuulka ka xibiya dhowr qoys. Sidaas darteed, adeeg waxbarasho in ay heli karaan ayaa suuragal ah balse xogta la xiriirta qaabka ay u helayaan iyo cidda loo marayo aysan garaneyn qoysaska soo laabtay.

Hooyo 34 jir ah oo heysata lix caruur ah oo aan ku wareysannay Baydhabo waxa ay inoo sheegtay in caruurteeda "*aanay aadin iskuul. Waxa aan heystaa wiil dhiganayay fasalka toddobaad, markii aan joognay Dhoobleey-na waxa naloo sheegay in*

*caruurteenna ay heli doonaan waxbarasho lacag la'aan ah. Markii aynu nimid halkan ma aanan arag cid noo sheegeysa in aan caruurteenna geyno iskuul, mana lihin tabar aan ku raadinno hay'ado caruurteenna iskuul ka bixiya maadaama aanan xitaa heysanin guri lana dhibaatooneyno sidii aan u heli lahayn meel aan qorraxda uga gambanno*."

Aabbe 44 jir ah oo heysta 13 caruur ah ayaa sidoo kale inoo sheegay in "*caruurta aanay heysannin waxbarasho, sababtoo ah ma awoodo in aan u helo cunno iyo biyo iskaba daa waxbarasho.*"

Qoysaska soo noqday oo aan wareysannay waxa ay inoo sheegeen in waxbarashadu ay muhiimadda koowaad u tahay. Sidaas si lamid ah, warbixin dhawaan uu daabacay Machadka Heritage waxa ay muujineysaa in waxbarashadu ay ahayd ahmiyadda labaad ee shacabka marka lagasoo tago amniga.[30] Tan iyo burburkii dowladdii dhexe ee sanadkii 1991, waxbarashada Soomaaliya waxa ay gacanta u gashay ganacsato, taasi oo aan fursad siineynin qoysaska saboolka ah ee aan heysannin dhaqaale ay caruurtooda wax ku baraan. Toddobaatan boqolkiiba Soomaalidu waxa ay da'doodu ka hooseysaa 30 sano, kaliya 30 boqolkiiba oo caruurta Soomaalida ah ayaana iskuul dhigata, taasi oo muujineysa in inta badan shacabku aanay heysanin fursad waxbarasho.[31] Nidaamka waxbarashada Soomaaliya waxa uu wajahayaa caqabado badan oo ay kamid tahay kaabayaashii oo burbursan. Iskuullo markii horeba la daalaa dhacayay tayo xumo ayaa hadda waxa kusoo biiraya caruur cusub, gaar ahaan magaalada Kismaayo, oo ah magaalo marti gelineysa qaxooti badan oo soo laabanaya. Macalin Kismaayo ku sugan waxa uu yiri, "*waxa aan arkaa arday badan oo Kenya ka timid oo iskuulka kusoo biireysa. Fasal ay dhiganayeen 35 arday ayaa hadda waxa dhigta 65 arday.*"

## Arrinta Kismaayo

Kismaayo oo ahayd mid kamid ah magaalooyinka ugu qalalaasaha badnaa tan iyo burburkii dowladdii dhexe, waxa ay sanadihii danbe heshay amni kadib markii la dhisay maamulka Jubaland. Amniga Kismaayo oo wanaagsan iyo degaanada hoos taga Jubaland sida gobolka Jubada Dhexe oo gebi ahaanba ay maamulaan Al-Shabaab waxa ay ka dhigeysaa Kismaayo magaalada ugu horreysa oo ay hiigsadaan qaxootiga kasoo laabanaya Dhadhaab. Waxa jira in magaaladu ay fideyso maadaama qoysas badan ay soo degayaan.

Magaalada oo haatan hoy u ah in ka badan 45,000 oo ah dadka kasoo laabtay Dhadhaab ayaa waxaa la filayaa in qoysas kale ay soo gaaraan. Qiyaastii 217,167 qofood oo ah qaxootiga ku nool Dhadhaab ayaa bishii May ee sanadkii 2016 sheegay in ay markoodii

[30]"A Memo for Somalia's New Leaders on the Priorities of Citizens," The Heritage Institute for Policy Studies, April, 2017.http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2017/04/HIPS_Policy_Brief_013_2017_ENGLISH.pdf

[31]"Kusaabsan Soomaaliya". http://www.so.undp.org/content/somalia/en/home/countryinfo.html ; "Waxbarashada Soomaaliya". https://www.unicef.org/somalia/education.html

hore ka yimaadeen gobollada Jubooyinka sida ay muujineyso tirakoobka UNHCR. Xogta hay'addan waxa ay sheegeysaa in ku dhawaad 70 boqolkiiba dhammaan qaxootiga ku nool Dhadhaab ay ka yimaadeen labada gobol ee Jubooyinka.[32] Sida aan horey usoo sheegnay, qaxooti badan ayaa markii ay soo laabteen degay xeryo qaxooti kuwa kalana waxa ay la dhibaatoonayaan bixinta kirada guryo yaryar ee laga dhisay duleedka magaalada. Shacabka magaalada oo ay heysatay shaqo la'aan baahsan iyo adeegyadii dowladda oo aanay heleynin sida waxbarasho iyo adeeg caafimaad ayaa waxaa kusoo biiraya tiro badan oo qaxooti ku ahaa xerada Dhadhaab.

Maamul goboleedka Jubaland waxa uu si firfircoon ugu doodayay xuquuqaha qaxootiga soo laabanayo. Waxaana jirtay in sanadkii 2016 uu maamulku mar joojiyay in uu aqbalo qaxooti cusub, waxa uuna ku eedeeyay hay'adda UNHCR in qaxootiga ay kusoo daabulayaan Kismaayo iyaga oo aanan taageero ku filan siineynin. Sikastaba ha ahaatee, wadahadal ay yeehseen UNHCR iyo maamulka Jubaland waxa ay isku afgarteen in qaxootiga loo oggolaado in la geeyo Kismaayo.

Qaar kamid ah qaxootiga lasoo celiyay ee aan ku wareysannay Muqdisho iyo Baydhabo waxa ay inoo sheegeen in ay hadda ka shallaynayaan in ay doorteen in ay ku laabtaan Muqdisho iyo Baydhabo. Waxa ay sheegeen in ay u wanaagsanaan laheyd in ay aadaan Kismaayo maadaama sida ay aaminsan yihiin qaxootiga Kismaayo ku noqday ay helayaan waxbarasho lacag la'aan ah iyo adeeg caafimaad.

Wasiir ka tirsan mamulka Jubaland, hay'ado aan dowli ahayn, iyo dadka deegaanka ayaa dhammaantood si isku mid ah u sheegay in magaalada Kismaayo oo xaalado adag la daalaa-dheceysay ay hadda culeys ku tahay awoodna u lahayn in ay martigeliso qaxootiga tirada badan oo kusoo laabanaya. Waxa ay sheegeen in loo baahan yahay istaraatiijiyad in ay la yimaadaan dowladda federaalka, maamulka Jubaland iyo hay'adaha caawinaadda bixiya.

Haddii qaxootigan lagu celiyo Kismaayo iyaga oo aan loo haynin xal waara, waxa ka dhalan karta khatar amni waxaana sidoo kale suuragal ah in uu khilaaf ka dhex dhasho qaxootiga iyo dadka degaanka ee horay ugu noolaa Kismaayo.

## Dib-u-celin iyo Dib-u-Dejin Rasmi ah

Qaxootiga kusoo laabanaya Soomaaliya waxa ay wajahayaan dhibaatooyin fara badan kuwaasoo u badan in ay ku adagtahay in ay helaan dhul ay degaan, shaqo la'aan, adeegyo dowladeed oo aan jirin, amni xumo iyo burburka kaabayaasha. Dadka soo noqday oo aan wareysannay intooda badan waxa ay inoo sheegeen in ay markoodii hore deganaayeen dhulka baadiyaha ah oo ay hadda ka taliyaan Al-Shabaab haddana lagu khasbay in ay ku noolaadaan magaalooyin dadku ku badan yahay.

[32]Tirakoobka UNHCR

Dowladda Soomaaliya kaalin muuqata kuma laha barnaamijka soo celinta qaxootiga. Halka hay'ad ee dowliga ah ee arrimahan ku lugta leh waa Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha oo la aasaasay sanadkii 2013, hay'addan oo xiriir shaqo la leh hay'adda UNHCR ayaa ku tiirsan dhaqaale ay ka hesho hay'ado aan dowli ahayn. Bishii Agoosto 2017, Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha iyo UNHCR waxa ay Muqdisho ku martigeliyeen 'shirweyne qaran ee u helidda xal waara qaxootiga soo laabanaya iyo barakacayaasha' waxa ayna casumeen masuuliyin ka tirsan dowladda heer federaal iyo heer maamul goboleed, iyo sidoo kale xubno katirsan qaxootiga Soomaalida ee ku nool dalalka deriska, qaxootiga soo laabtay, barakacayaal, bulshada rayidka, iyo hay'ado caalami ah. Raysal-wasaaraha dowladda federaalka Soomaaliya ayaa u sheegay madasha in dowladdiisu ay arrinta qaxootiga siineyso ahmiyad. Isla Bishii Agoosto 2017 hay'adda qaxootiga iyo barakacayaasha ayaa bilowday in ay maamusho xarunta nasashada ee ay ku hakadaan qaxootiga soo laabanaya ee ku taalla Muqdisho, hay'adda ayaa wakiil ka ah UNHCR.

Qorshaha Horumarinta Qaranka Soomaaliya (2017-2019) waxa uu xusay in loo baahan yahay in xal waara loo helo qaxootiga soo laabanaya si loo taageero in ay dadka kale ku dhex milmaan. Sikastaba ha noqotee, marka laga soo tago qoraalka, dowladdu uma muuqato in ay tahay mid ku howlan arrimaha qaxootiga iyo barakacayaasha. Masuul dowladda ka tirsan oo la hadlay Machadka Heritage ayaa shegay in "dowladda Soomaaliya aanay ka dhigin arrinta qaxootiga iyo barakacayaasha ahmiyadda 1, 2, 3, ama xitaa 4." Daneyn la'aanta dowladda iyo in aaney jirin isku xirnaan u dhexeysa dowladda iyo hay'adaha caawinaadda bixiya waxa ay dhibaatada haysata dadka soo laabanaya ka dhigeysaa mid sii jirta, waxa ayna caqabad ku noqoneysaa dib-u-dejintooda.

Qorshe taageeraya dib u celin iyo dib u dejin, helidda waxbarasho lacag la'aan ah, daryeel caafimaad, taageero soo saarashada nolol maalmeedka, iyo helidda dhul ayaa si deg-deg ah loogu baahan yahay si loo xalliyo baahida dadka soo noqonaya. Kismaayo iyo Baydhabo waxa ay la daalaa dhacayaan marti gelinta qoysaskii horay loogu celiyay, waxaana magaalooyinkan ku adkaaneysa in ay martigeliyaan qoysas hor leh haddii aan laga shaqeyn qorshe rasmi ah oo dadka soo laabanaya dib loogu dejinayo.

Maadaama aaney jirin taageero rasmi ah oo ay helaan, waalidiinta qaar ma awoodaan in ay quudiyaan caruurtooda waxa ayna ka fikirayaan in ay dib ugu laabtaan xeryaha Dhadhaab. Xaaladda adag ee nololeed ee ay la kulmeen markii ay soo laabteen kadib ayaa noqotay mid ay dadka qaar u adkeysan waayeen. Waxa lasoo weriyay in waalid ku noolaa duleedka Muqdisho uu is-miidaamiyay sida uu qof soo noqday inoo sheega, *"waxaan kuu sheegayaa in nin oday ah oo Dhadhaab kasoo laabtay bishii Luulyo, oo ahaa qof aqoon leh oo shahaado haysta kuna noolaa Ceelasha uu is dilay. Kaligiis ayaa caruurtiisa korsan jiray, markii uu ku noolaa kenya-na waxa uu helayay*

*caawinaada uu u baahan yahay sida waxbarasho iyo caafimaad, laakiinse halkaan caawinaadaas kuma helin.*"

## Amniga

Xog uruurin dhawaan uu daabacay Machadka Heritage kana hadleysay ahmiyadda muwaadiniin ku sugan ilaa shan magaalo waxa ay muujisay in dad ka badan kala bar dadka xog uruurinta laga sameeyay uu amnigu ahaa ahmiyaddooda koowaad. Dadka deggan kismaayo waxa ay ahaayeen dadka kaliya ee amnigu u ahaa ahmiyadda labaad waxa ayna baahidooda koowaad ahayn waxbarasho.[33] Xasiloonida ka jirta Kismaayo iyo aragtida baahsan ee ah in Kismaayo ammaan tahay ayaa suuragal ah in ay sabab u tahay in tiro badan oo qoysaska soo laabtay kamid ah oo markoodii hore dhulka baadiyaha degganaa ay doorteen in ay degaan Kismaayo.

Inkastoo inta badan dadka soo laabtay ay sheegeen in ay dhibaatooyin badan kala kulmi jireen ciidamada ammaanka Kenya, haddana qaar badan oo la hadlay Machadka Heritage ayaa sheegay in xeryaha qaxootiga ay ka amni fiicnaayeen Soomaaliya, gaar ahaan Muqdisho. Qaar kamid ah dadka aan ku wareysannay Muqdisho waxa ay inoo sheegeen in labo qof oo kamid ah dadkii soo laabtay ay dhawaan ku dhinteen Muqdisho kadib markii meel ay joogeen uu ku qarxay gaari walxaha qarxa lagasoo buuxiyay.

Inta badan dadka aan wareysannay ma heysan shaqo. Dhalinyarada shaqo la'aanta ah oo aan haddana haysanin fursado waxbarasho ama tababar waxa ay keeni kartaa in ay ku biiraan ciidamada dowladda ama ururada hubeysan, taasoo nafsaddooda khatar gelineysa.

*"Waxa aan ahay qof dhalinyaro ah waxaana u baahanahay wax aan ku mashquulo. Xitaa in aad banooni ciyaarto waxa aad u baahan tahay lacag. Wax lacag la'aan ah meeshaan ma jiraan. Guriga ayaan joogaa 24 saac maalin kasta. Waxa aan dhiganayay fasalka 12-aad ee iskuulka markii aan joogay Kenya, waxaana ku mashquulsanaa waxbarashadeyda,"* waxa sidaas yiri wiil 18-jir ah ee ku nool Muqdisho.

## Gunaanad

Tan iyo markii la bilaabay in qaxootiga ku noolaa xerada Dhadhaab dib loosoo celiyo, in ka badan 73,000 oo qof ayaa Soomaaliya la keenay – inta badan dadkan waxa la geeyay kismaayo. Hannaanka dib-usoo-celinta lama dhihi karo waa mid dadka iskood u go'aansadeen maadaama Kenya aanay siinin qaxootiga xal kale oo aan ahayn in ay dib ugu laabtaan dalkooda. UNHCR iyo hay'ado gargaar ayaa sidoo kale qeyb ka ah in qaxootiga lasoo celiyo. Adeegyadii ay

[33]"A Memo for Somalia's New Leaders on the Priorities of Citizens,"The Heritage Institute for Policy Studies, April 2017.http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2017/04/HIPS_Policy_Brief_013_2017_ENGLISH.pdf

helayeen sida cunnaddii iyo biyihii ayaa laga yareeyay xeryihii ay ku noolaayeen. Waxa ay UNHCR siisay qaxootiga xog aan ku filneyn, masuuliyiinta Kenya-na waxa ay faafinayaan xog ah qofkii aan is diiwaangelinin in uu si iskiis ah u laabanayo lagu khasbi doono ugu danbeyn in uu laabto, islamarkaana weyn doono taageerada hadda la siinayo qoysaska isku diiwaan gelinayo in ay iskood u baxayaan.

Dadka kusoo laabtay Soomaaliya waxa ay taageero aad u yar ka heleen UNHCR iyo hay'adaha shaqo wadaagga la ah. Ma jirto taageero ay ka heleen dowladda Soomaaliya marka laga reebo maamulka Jubaland oo isagu u dooda xuquuqda qaxootiga kusoo laabtay Kismaayo. Hoy la'aan, nolol xumo, shaqo la'aan, waxbarasho la'aan, iyo adeegyo caafimaad oo aan jirin ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn oo ay wajahayaan dadka soo laabtay. Dadkan intooda badani waxa ay ahaayeen xoolo dhaqato, waxaana hadda lagu celiyay magaalooyin dadku ku badan yihiin sababtoo ah goobihii ay markii hore ka barakaceen ayaan ammaan ahayn. Kismaayo oo ah magaalada dadka soo noqonaya intooda badani doorteen, waxa ku adag in ay dejiso dadkan. Barnaamijyo wax-ku-ool ah, fursado shaqo, dhul, iskuullo, xarumo caafimaad iyo guryo ayaa loo baahan yahay si loo sahlo in dadka soo laabtay ay noqdaan kuwo degaan noqda oo dadka dhex gala.

## Talooyin

- Dowladda federaalka waa in ay ahmiyad siisaa arrinta qaxootiga, waana in ay ka shaqeysaa sidii xal waara loogu heli lahaa arrina qaxootiga. Dowladdu waa in ay abuurtaa xaalad oggolaaneysa in qaxootiga si iskood ah ugusoo laabtaan una degaan Soomaaliya.

- Dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada waa in ay nabadeeyaan dalka gaar ahaan degaanada Jubaland iyo Koofur Galbeed oo ay qaxootiga intooda badan asal ahaan kasoo jeedaan. Ammaanka waxa uu muhiim u yahay in qoysaskan si iskood ah usoo laabtaan isla markaana u degaan deegaannadoodii.

- Dowladda federaalka, maamul goboleedyada, Qaramada Midoobay, iyo hay'adaha gargaarka kale waa in ay maalgeliyaan kaabayaasha bulshada sida iskuullada iyo isbitaallada ee ku yaalla goobaha ay kusoo laabanayaan qaxootiga sida kismaayo iyo Baydhabo.

- Maamul goboleedyada waa in ay dhul u qoondeeyaan qoysaska soo laabanaya si ay u fududaato in ay helaan degaan rasmi ah.

- Saxiixayaasha heshiiskii saddex geesoodka (UNHCR, dowladda federaalka Soomaaliya, iyo dowladda Kenya) waa in ay joojiyaan soo celinta qaxootiga inta laga helayo qorshe dib-u-dejin rasmi ah loogu sameyn karo qaxootiga.

- Dhimidda ay UNHCR iyo hay'adaha kale dhimeen adeegyadii, cunnadii iyo biyihii xeryaha qaxootiga waxa ay khatar gelineysaa nolosha qaxootiga waxa ayna ku khasbeysaa qaar badan in ay Soomaaliya usoo laabtaan. Hay'adahan waa in ay joojiyaan in ay Kenya sida ay rabto u yeelaan islamarkaana waa in adeegyo dhameystiran ay siiyaan qaxootiga una fududeeyaan qofkii raba in uu si iskiis ah ugu laabto Soomaaliya.

- UNHCR waa in ay dejisaa farsamo lagu kormeero laguna qiimeeyo adeegyada ay hay'adaha ay shaqada u dhiibatay siiyaan dadka soo laabanaya. Tani waxa ay xaqiijineysaa in dadka soo noqonaya helaan taageeradii loogu tala galay.

- Siyaasiyiinta iyo masuuliyiinta kale ee Kenya waa in ay joojiyaan cabsigelinta iyo eedeynta ay kala dul dhacayaan qaxootiga oo kamid ah bulshada kuwa ugu tabarta daran. Kenya waa in ay la timaadaa qorshe u oggolaanaya qaxootiga ku dhashay Kenya, qaraabo ku leh, lana qabsaday nidaamka Kenya in ay bulshada kamid noqdaan. Qorshahan ayaa ah mid ka wanaagsan in dhammaantood loosoo celiyo Soomaaliya, taasoo keeni karta in Al-Shabaab ay qortaan koox u careysan Kenya, sawaaxiliga ku hadasha, Kenyana aad u kala yaqaan.

The Heritage Institute For Policy Studies